# Adiga laguma siin sharciga degganaanshaha dalkaan Finland

Hoggaanka socdaalka waxaa uu codsigaagii magangalyoddoonka ahaa ka gaaray go'aan diidmo ah. Waxaa loolaa jeedaa, in iyadoo lagu salaynaayo hawlahaagii magangalyoddoonka aadan helin sharcigii degganaanshaha dalkaan Finland.

Haddii aad codsigaagii magangalyoddoonista ka sokow samaysay codsi kale oo dheeraad ah oo ku saabsan sharciga degganaanshaha, Waxaad heli doontaa go'aan gaar ah oo arrinkaas khuseeya.

## Go'aanka aad heshay waxaad si dhakhso ah ugu sheegtaa qareenkaaga iyo shaqaalaha xerada qaxootiga

Qareenkaaga iyo shaqaalaha xerada qaxootiga warbixinta ku saabsan go'aankaaga si ootomaatig ah uma helayaan, oo ma ogaan karaan.

U sheeg qareenkaaga, in lagu siiyay go'aan diidimo ah, haddii aadan lahayn qareen, oo aad doonayso in qareen laguu sameeyo, shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa kaala talin doona arrimaha aad u baahan tahay.

Waxaa muhiim ah in aad u sheegto shaqaalaha xerada qaxootiga, in aad heshay go'aankii Hoggaanka socdaalka. Shaqaalaha xerada qaxootigu waxaa ay markaa adiga ku siinayaan talooyinka la xiriira waxyaabaha dhacaya ee ku xiga go'aankaan diidmada ah.

## Waxaad hubisaa xuquuqdaada shaqo qabasho

Waxaad islamarkiiba ka hubisaa go'aankaaga, in xuquuqdaadii shaqo qabasho ay wali shaqaynayso iyo inkale. Go'aanka waxaa laguugu sheegay, wakhtiga ay xuquuqdaada shaqo qabasho bilaabanayso. Haddii aad shaqayso, si dhakhso ah ugu sheeg shaqo bixiyahaaga, haddii xuquuqdaada shaqo qabasho ay dhammaatay.

Faahfaahinta ku saabsan xuquuqdaada shaqo qabasho waxaad ka heleysaa boggayaga internetka: [migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus](migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus).

# Go'aanka kaddib si iskaa ah ayaad dalka uga bixi kartaa, ama racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka

## Iskaa u noqoshada

Haddii aadan racfaan ka qaadanayn go'aankaaga, oo aad doonayso in aad si iskaa ah dib ugu laabato dalkaagii hooyo, waxaad codsan kartaa caawimaadda la siinaayo qofka sida iskiisa ah u noqonaaya. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa adiga kaala talinaaya qaabka loo codsado caawimaaddaas.

Shuruudda ku xiran siinta caawimaaddaas, waa in aad si iskaa ah uga tagtaa dalka Finland. Waxaa waajib kugu noqonaysa in aad iska kansasho codsigaagii magangalyoddoonka qaxootinnimo, ama racfaankii aad ka samaysay go'aankii la xiriiray arrinkaas.

Faahfaahinta dheraadka ah ee la xiriirta dib u laabashada aan khasabka ahayn waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Hoggaanka socdaalka: https://migri.fi/paluu

## Racfaan ka qaadashada go'aanka ee loo diro maxkamadda maamulka

Waxaad heleysaa hagis ama tilmaanbixin ku saabsan sida racfaanka loo samaynaayo, taasoo ku lifaaqan go'aanka. Dukumintigaan waxaa loogu yeeraa ama loo yaqaan hagista ama tilmaamaha racfaanka. Haddii aad doonayso in aad racfaan qaadato, waxaad u baahan tahay qareen kaa caawiya arrimaha sharciyada maxkamadda. Qareenka ayaa adiga kaa caawinaaya racfaanka. Haddii aad u baahan tahay, shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa kaa caawinaaya sidii aad ku heli lahayd qareenka.

## Maxkamadda maamulka ayaa go'aan ka gaaraysa racfaankaaga

Haddii ay maxkamadda maamulku diiddo racfaankaaga, waxaad weli ka codsan kartaa maxkamadda sare ee maamulka, oggolaanshaha ku saabsan racfaan qaadashada. Ma ay baarayso dhammaan racfaannada oo dhan.

Maxkamadda maamulka iyo maxkamadda sare ee maamulkaba waxaa ay
- burin karaan ama diidi karaan go'aanka
- amri karaan, in codsigaaga mar labaad la falanqeeyo
- amri karaan in adiga lagu siiyo sharciga degganaanshaha ama
- waxaa ay diidayaan racfaankaaga.

Marka aad racfaanka ka qaadato go'aanka Hoggaanka socdaalka, Hoggaanka Socdaalku ma ahan mar dambe hay'adda dawladda ee falanqaynaaya arrinkaaga.

Haddii aad qabto su'aalo la xiriira arrinkaaga, amaba aad doonayso in aad soo dirto caddaymo dheeraad ah, waxaad la xiriirtaa qareenkaaga, ama maxkamadda maamulka oo ah cidda arrinkaaga gacanta ku haysa.

## Go’aanka waxaa laguugu sheegay, goorta uu go’aanku yahay mid dhaqangalaaya

Adiga laguuma oggolaan in lagu siiyo sharciga degganaanshaha dalkan Finland, iyadoo lagu saleynaayo codsigaaga magangalyoddoonka qaxootinnimo. Go’aanka waxaa laguugu sheegay, goorta uu go’aanku yahay mid dhaqangalaaya. Booliska ayaa ka mas’uul ah dhaqangelinta go’aanka.

Waxaa isla wakhtigaa la amri karaa in aadan dalka soo geli karin. Arrinkaan waxaa loola jeedaa inaadan dib ugu soo laaban karin dalkaan Finland, aagga dalalka la isku yiraahdo Schnegen ama dalalka kale ee xubnaha ka ah ururka Midowga Yurub. Diidmadu waa mid shaqaynaysa illaa iyo amar dambe ama mid wakhti loo qabtay leh. Waxaana arrinkaan laguugu sheegayaa go’aanka.

Booliska ayaa diyaarinaaya dib u celinta, taasoo loola jeedo in uu adiga kuu diyaarinaayo tigidkii diyaaradda, waxaa boolisku ay ku gaynayaan illaa iyo xadka Finland ama illaa iyo dalkaagii hooyo.

## Hawlwadeennada dawladdu waxay kugu amri karaan in aad isa soo diiwaan geliso ama waxaa ay ku gaynayaan Waaxda haynta kummeelgarka ah

Booliska ama hoggaanka ilaalada xudduudka ayaa waxay ku amri karaan in aad iska soo diwaangelin geliso xerada qaxootiga ama saldhigga booliska wakhtiyo la isla ogyahay oo ay kuu qabteen. Sidoo kale waxaa ay ku gayn karaan waaxda haynta kummeelgaarka ah. Sidoo kale xaaladaha qaarkood Hoggaanka socdaalka ayaa adiga kugu amri kara in aad iska diiwaangeliso xerada qaxootiga, ama aad ku noolaato xero qaxooti oo gaar ah.

Waaxda haynta kummeelgaarka ah waa goob xiran oo aan lag soo bixi karin. Haddii lagu gaynaayo waaxda haynta kummeelgaarka ah, waa in adiga laguu sheego sababta halkaas laguu geeyay, waana in lagu siiyo warbixinta ku saabsan falanqaynta arrinka la xiriira gaynta haynta kummeelgaarka ah, iyo suurtaggalnimada ah in aad heli karto caawimaadda arrimaha sharciga ah.

## Waajibka ah in aad samayso wadashaqayn

Haddii lagugu celinaayo dalkaaga hooyo, waxaa adiga ku saaran waajibka ah in aad wadashaqayn la samayso hay’adaha dowladda, inta lagu guda jiro dhammaan marxaladaha la xiriira dal ka saarista. Arrinkaan waxaa loola jeedaa in ay adiga waajib kugu tahay

- in aad sheegto dhammaan waxyaabaha lagama maarmaanka u ah xaqiijinta aqoonsigaaga
- in aad sheegto dalalkii aad soo martay ka hor inta aadan imaan Finland
- in aad ahaato mid si fudud loo heli karo inta lagu guda jiro nidaamka la xiriira dal ka saarista

- in aad codsi u gudbiso hawlwadennada dalkaaga, kaasoo ku saabsan sidii aad ku heli lahayd dukuminti safar oo shaqaynaya, iyo
- in aad gacan ka geysato arrinka ah, in hawladeennada dalkaagu ay ku aqoonsan karaan si ay kuu siiyaan dukumintiga safarka.

Haddii aadan fulin waajibkaaga wadashaqaynta ah, waxaa lagu lagu gayn karaa waaxda haynta kummeelgaarka ah(säilöönotto), ama waxaa lagugu amri karaa in aaadan dalka soo geli karin.

## Haddii aad hayso sababo cusub oo aad ku codsan karto magangalyda qaxootinnimada, waad samayn kartaa codsiga cusub

Haddii aad hayso sababo cusub oo aad ku codsan karto magangalyada qaxootinnimada, kaddib marka go'aanka Hoggaanka socdaalka ee codsigaagii uu yahay mid dhaqanggal ah, waxaad samayn kartaa codsi cusub oo magangalyddoonka qaxootinnimada ah. Codsiga cusub waa in aad samaysaa islamarka aad hayso sabab cusub ama aad u baahan tahay.

### ▪ Waan in aad sheegtaa sababta aad arrimahan cusub ee aad hayso hore ugu sheegi wayday

Sababaha aadan hore ugu sheegin arrimahaan cusub ee aad codsiga labaad ku salaynayso, waa in noqdaan kuwo aadan awoodin in aad saamayn ku yeelato. Intaa kaddib Hoggaanka socdaalka waxaa uu qiimaynayaa arrinka ah, in uu codsigaaga dib u baaraayo iyo inkale. Haddii Hoggaanka socdaalku uu u arko , in aadan haysan sababo cusub oo ku saabsan codsiga magangalyoddoonka qaxootinnimo, waxaa lagaa gaari doonaa go'aan ku saabsan, in aan codsigaaga la baarayn. Go'aankana waa laguu sheegayaa.

## Xaaladaha qaarkood, mar dambe laguma siinaayo adeegyadii xerada qaxootiga

Haddii boolisku uusan waddanka kaa saari karin, laakiin aad awooddo in aad si iskaa ah dib ugu laabato dalkaagii hooyo, boolisku wuxuu arrinkaa si dhakhso ah ugu sheegayaa xerada qaxootiga. Intaa dabadeed waxaad haysataa 30 maalmood oo aad wadanka si iskaa ah uga bixi karto, ama aad ku dalban karto cawimaadda iskaa u noqshada.

Marka 30-ka maalmood ay dhammaato, adeegyadii xeradaada qaxootiga waa ay joogsanayaan. Markaa macnaheedu waxaa weeye in aadan mardambe  sii degganaan karin xerada qaxootiga, mana heleysid lacagta biilka xerada ama adeegyada kale ee laga bixiyo xerada qaxootiga.

### ▪ Haddii aad samaysay codsiga magangalyoddoonka qaxootinnimada ee cusub

Haddii aad samaysay codsi cusub oo maganagalyoddoonka qaxootinnimada ah, adeegyadaadii xerada qaxootiga waxaa ay joogsan

karaan, islamarkaa uu boolisku ku siiyo wargelinta go’aanka. Arrinkaas wuxuu dhici karaa, haddii marka aad heshay go’aanka codsigaagaan kaddib, aad hore u haysatay 30- ka maalmood oo aad isticmaashay adeegyadii xerada qaxootiga.

## Waxaad ka heleysaa faahfaahin dheeraad ah

- Bogga internetka ee Hoggaanka socdaalka: migri.fi/turvapaikka-suomesta
- Fiidiyowga Hoggaanka socdaalka ee ah ”Go’aanka diidmada ah”: migri.fi/videot-turvapaikanhakijoille